



Macaashka Internet-ka ee Degdega ah waa barnaamijka kumeelgaarka ah ee FCC si looga caawiyo qoysaska aan awoodi karin inay iska bixiyaan adeegga internet-ka xilliga safmarenka.

Macaashyada waxay bixiyaan:

- Qiimo-dhimis gaaraysa ilaa \$50/bishiiba ee loogu talagalay adeegyada internet-ka;
- Qiimo-dhimis gaaraysa ilaa \$75/bishiiba ee loogu talagalay qoysaska u-qalma ee deggan dhulalka Qabiileed; iyo
- Qiimo-dhimis hal mar ah oo dhan illaa \$100 oo loogu talagalay laptop-ka, kombiyuutarka, ama tablet-ka la soo iibyo iyadoo loo marayo bixiyaha kaqeybqaadanaya.

### Arag inaad U-qalanto oo Codso

Wac: 833-511-0311

Booqo: [GetEmergencyBroadband.org](http://GetEmergencyBroadband.org)

# Macaashka Internet-ka ee Degdega ah

## Adigu Ma U-qalantaa?

Qoysku wuu u-qalmaa haddii xubin qoyska ka mid ah uu buuxiyo mid ka mid ah shuruudaha hoose:

- Haysto dakhli dhan ama ka hooseeya 135% ee Tilmaamaha Saboolnimo ee Dawladda ama kaqeybgalo barnaamijyada kaalmo ee dawladda qaarkood.
- Hesho macaashyada hoos yimaada barnaamijyada quraacda ama qaddada ee bilaashka ah ama qiimaha jaban.
- Heshay Kabista Pell Grant ee Dawladda inta lagu gudajiray sannadka abaalmarinta.
- Ku soo foodsaartay khasaaro badan oo dakhli iyadoo ugu wacan tahay shaqo lumis ama fasax shaqo ka maqnaansho tan iyo Febraayo 29, 2020.
- Buuxisay shuruudaha u-qalmitaanka ee dakhliga jira ee hooseeya ee bixiyaha ama barnaamijka COVID-19.

## Sida loo Codsado

Waxaa jira seddex qaab oo loo codsado Macaashka Internet-ka ee Degdega ah::

1. **Si toos ah ula xiriir bixiyaha kaqeybqaadanay a ee aad doorbideyso si**  
aad wax uga ogato geedi-socodka codsigooda.
2. **Booqo [GetEmergencyBroadband.org](http://GetEmergencyBroadband.org)**  
oo ka codso onlaynka iyo si aad uga hesho bixiyeyaasha kaqeybqaadanaya ee kuu dhow.
3. **Dhammeystir codsadiga lagu** soo diro boostada oo u soo dir caddeyn u-qalmitaanka:  
Emergency Broadband Support Center  
P.O. Box 7081  
London, KY 40742



Wax badan ka ogow barta  
[fcc.gov/broadbandbenefit](http://fcc.gov/broadbandbenefit).